

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD



ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 26^{AAD}

CADADKA 1^{AAD}

TAARIIKH: 11/1/26

Lam. 01

FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

Ansixinta Sharciga Hay'adda Tayo-dhawrka Dowladda Puntland

TUSMADA

Qeybta 1 ^{aad}	<i>Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah Ansixinta Sharciga Hay'adda Tayo-dhawrka Dowladda Puntland</i>
Qeybta 2 ^{aad}	<i>Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha. WAXBA MALEH</i>
Qeybta 3 ^{aad}	<i>Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda. WAXBA MALEH</i>
Qeybta 4 ^{aad}	<i>Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha. WAXBA MALEH</i>
Qeybta 5 ^{aad}	<i>Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda. WAXBA MALEH</i>



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lr. 001 ee 11-ka January 2026, kuna saabsan Ansixinta Sharciga Hay'adda Tayo-dhawrka Dowladda Puntland.

Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/50/2025, kuna taariikhaysan 13-ka Deseember 2025.

Markuu Tixgeliyey: Baahida loo qabo Sharciga Ansixinta Hay'adda Tayo-dhawrka Dowladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1^{aad}

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Ansixinta Sharciga Hay'adda Tayo-dhawrka Dowladda Puntland.


Qodobka 2^{aad}

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

Qodobka 3^{aad}

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland


Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dawladda Puntland



DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA



ولاية بونت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:-XGGW/DPL/50/2025

Garowe, Sabti

Taariikh: - 13/12/2025

Ku: - Madaxweynaha DPL

Garowe

Ujeedo:-Ansixinta Xeerka Hay'adda Tayo-dhawrka Puntland

Mudane Madaxweyne,

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -

MARKUU ARKAY:-

Qodobada 60-aad (1), 64-aad (1), 68-aad(b) iyo 70-aad (1) ee Dastuurka Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:-

Qodobadda 2-aad (1), 3-aad (1), 57-aad(1) iyo 58-aad ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:-

Go'aanka Golaha Wakiillada ee kalfadhigii 54-aad fadhigiisa 17-aad ee 29/07/2024 gaar ahaan qodobkiisa 5-aad

MARKUU TIX-GELIYEEY: -

Muhiimadda ay leedahay samaynta Xeerka Hay'adda Tayo dhawrka Puntland.

MARKUU ARKAY: -

Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 57-aad fadhigiisii 17-aad ee 27.11.2025 uu ku Ansixiyey Xeerka Hay'adda Tayo Dhawrka Puntland. Guntanka Fadhiga oo ahaa (35) Mudane,waxaa ugu codeeyey oggol (29) Mudane, diidmo (2) Mudane, halka ay ka aamuseen (4) Mudane.

WUXUU GUDDOOMIYEEY: -

Ansixinta Xeerka Hay'adda Tayo-dhawrka Puntland

Wada Shaqeyn Wacan

Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.





**DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND**

**XEERKA HAY'ADDA TAYO-DHAWRKA
PUNTLAND**

Garoowe November, 2025

TUSMADA

CUTUBKA 1-AAD.....	1
HORDHAC.....	1
Qodobka 1-aad	1
Magaca Xeerka	1
Qodobka 2-aad	1
Eray Bixin	1
Qodobka 3-aad	4
Ujeeddada Xeerka	4
Qodobka 4-aad	4
Baaxadda Xeerka	4
CUTUBKA 2-AAD	5
HAY'ADDA TAYO-DHAWRKA.....	5
Qodobka 5-aad	5
Dhismaha Hay'adda Tayo-Dhawrka Puntland	5
Qodobka 6-aad	5
Qaab-dhismeedka Hay'adda	5
Qodobka 7-aad	5
Magacaabista Mas'uuliyiinta Hay'adda	5
Qodobka 8-aad	6
Xilka iyo Waajibaadka Hay'adda	6
Qodobka 9-aad	7
Astaanta Hay'adda	7
Qodobka 10-aad	7
Shuruudaha Maareeyaha Hay'adda Iyo Ku-Xigeenkiisa	7
Qodobka 11-aad	7
Xil-waayidda Mas'uuliyiinta Hay'adda	7



Qodobka 12-aad	8
Dhaarta	8
Qodobka 13-aad	8
Xilka iyo Waajibaadka Maareeyaha Hay'adda	8
Qodobka 14-aad	9
Xilka iyo Waajibaadka Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda	9
Qodobka 15-aad	9
Hawl-wadeennada Hay'adda	9
Qodobka 16-aad	10
Warbixinaha Hay'adda	10
Qodobka 17-aad	10
Wada-Shaqeynta	10
CUTUBKA 3-AAD	11
MAALIYADDA IYO XISAABAADKA HAY'ADDA	11
Qodobka 18-aad	11
Maaliyadda	11
Qodobka 19-aad	11
Mushaharka, Gunnadda iyo Xuquuqaha	11
Qodobka 20-aad	12
Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka	12
CUTUBKA 4-AAD	12
HEER TAYEEDYADA	12
QODOBKA 21-aad	12
Rasmiyaynta ama Baahinta Heer-Tayeedka	12
QODOBKA 22-aad	13
Astaamaynta Heerarka	13
QODOBKA 23-aad	14



Diiwaanka Heer-Tayeedyada Dawladda Puntland.....	14
QODOBKA 24-aad	15
Ku-Dhawaaqidda, Faafinta iyo Hirgelinta	15
Waajibka Heer- Tayeedka	15
QODOBKA 25-aad	16
Dhawrsoonaanta Sharci ee Dukumintiga	16
Hay'adda Tayo-Dhawrka	16
CUTUBKA 5-AAD	17
HAL-BEEGYADA TAYO-DHAWRKA.....	17
QODOBKA 26-aad	17
Hal-Beegyada Tayo-Dhawrida	17
Ee Si KMG Ah Loogu Shaqeynayo	17
QODOBKA 27-aad.....	17
Diyaarinta Hal-Beegyada iyo Ansixintooda	17
QODOBKA 28-aad	17
Diiwaanka Hal-beegyada.....	17
QODOBKA 29-aad	17
Faafinta Hal-Beegyada.....	17
QODOBKA 30-aad	18
Hal-beegyada Khasabka ah.....	18
QODOBKA 31-aad.....	19
Dhaqan-gelinta Halbeegyada	19
QODOBKA 32-aad	19
Adeegsiga Cabirrada.....	19
Qodobka 33-aad.....	19
Baarayaasha	19
QODOBKA 34-aad	19
Awoodaha iyo Waajibaadka Baarayaasha.....	19



QODOBKA 35-aad	22
Khidmadda Heer-Tayeedka	22
QODOBKA 36-aad	22
Astaamaha Heerka Tayada iyo Shahaadada	22
QODOBKA 37-aad	22
Go'aannada Hay'adda Tayo-dhawrka	22
QODOBKA 38-aad	23
Iska hor imaadka Danaha Isdiidan	23
CUTUBKA 6-AAD	23
DEMBIYADA IYO CIQAABAHA	23
QODOBKA 39-aad	23
Ganaaxa	23
Qodobka 40-aad	23
Fal-Dembiyeedyada	23
Qodobka 41-aad	25
Ciqaabaha	25
Qodobka 42-aad	26
Shirkadaha	26
Qodobka 43-aad	26
Shaqaalaha iyo Wakiillada	26
Qodobka 44-aad	26
Gacansiinta ama Dhiirigelinta	26
CUTUBKA 7-AAD:	27
QODOBO KALA DUWAN	27
QODOBKA 45-aad	27
Kormeerka iyo Kor-joogtaynta	27
QODOBKA 46-aad	27



Xiriirrada Hay'adda.....	27
QODOBKA 47-aad	27
Ilaalinta Siraha Ganacsi	27
QODOBKA 48-aad	27
Dabarka Dacwadaha.....	27
QODOBKA 49-aad	28
Hirgelinta Shaybaar.....	28
QODOBKA 50-aad	28
Codsiga iyo Ilaalinta Xogaha	28
QODOBKA 51-aad.....	28
Fasiraadda Xeerka	28
QODOBKA 52-aad	28
Xeer-Nidaamiye.....	28
QODOBKA 53-aad	29
Burin.....	29
QODOBKA 54-aad	29
Dhaqan-galka Xeerka.....	29



CUTUBKA 1-AAD

HORDHAC

Qodobka 1-aad

Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Hay'adda Tayo-dhawrka Puntland.

Qodobka 2-aad

Eray Bixin

Haddii aan si kale xeerkan dhexdiisa loogu sheegin, erayadan waxaa loola jeedaa:-

Lr	Erayga	Macnaha
1.	Dastuur	Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed.
2.	Dawladd	Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed.
3.	Xeer	Waxaa loola jeedaa Xeerka Hay'adda Tayo-Dhawrka Puntland.
4.	Wasaarad	Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Maalgashiga.
5.	Wasiir	Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Maalgashiga.
6.	Maareeye	Waxaa loola jeedaa Maareeyaha Hay'adda Tayo-dhawrka Puntland.
7.	Tayo	Waxaa loola jeedaa waxtarka iyo fayyo qabka shay ama Badeecad.
8.	Hay'ad	Waxaa loola jeedaa Hay'adda Tayo-Dhawrka Puntland.



9.	Agab	Waxaa loola jeedaa shay kasta iyo dhammaan badeecadaha kala duwan ee Puntland la keeno, laga dhoofiyo ama laga soo-saaro.
10.	Baaris	Waxaa loola jeedaa daba-galka rasmiga ah oo ay hay'addu sameyso, si loo ogaado in loo hoggaansamay Xeerkan iyo Xeerarka kale ee dhaqan-galka ah.
11.	Cabbiraad	Waxaa loola jeedaa hab cilmi qiyaaseed lagu ogaado tilmaamaha dherer, mug, cuf iyo wixii lamid ah oo ay leeyihiin walxuhu.
12.	Hal-beeg caalami	Waxaa loola jeedaa heer tayeedka ama jaan-gooyada ay oggolaatay Hay'adda tayo-dhawrka caalamiga ah (ISO).
13.	Hal-beegga Puntland	Waxaa loola jeedaa heer tayeedka ama jaan-gooyada u gaarka ah Puntland ee lagu dabaqayo dhammaan Agabka iyo adeegyada.
14.	Joojin	Waxaa loola jeedaa diidmada agabka ku dhaca inuu buuxin waayo shuruudaha loo dejiyey.
15.	Shahaadada tayada	Waxaa loola jeedaa dukuminti caddeynaya tayada badeeco ama adeeg Hay'adda ka soo baxay.
16.	Summadda tayada	Waxaa loola jeedaa qoraal rasmi ah oo kasoo baxay Hay'adda tayo-dhawrka Puntland oo qeexaya heerka tayada walxaha laga hadlayo.
17.	Anfac	Waxaa loola jeeda wax kasta oo la quuto.
18.	Dhawridda	Waxaa loola jeedaa ilaalinta heerka tayo wanaaga dhammaan Badeecadaha iyo Adeegyada Puntland la keeno, laga dhoofiyo ama laga soo-saaro.



19.	Fasiraad	Waxaa loola jeedaa wixii aanu Xeerkani si cad u qeexin, waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka Puntland iyo xeerarka kale ee la xiriira xeerkan iyo haddii loo baahdo Xeerarka Caalamiga ah.
20.	Dhoofin	Waxaa loola jeedaa waxkasta oo laga qaadayo Puntland.
21.	Weel	Waxaa loola jeedaa gal ka samaysan biro oo lagu qaado alaabada si bed qabkooda loo sugo.
22.	Been abuur	Waxaa loola jeedaa adeeg ama badeeco kuwaas oo laga been sheegay asalkooda.
23.	Dukuminti	Waxaa loola jeedaa xog, xiriir ama xaqiiqooyin kasta oo la kaydiyo.
24.	Soo dejin	Waxaa loola jeedaa agab kasta oo Puntland la keeno ujeeddo kasta ha loo keeno.
25.	Heer-tayeedka caalamiga ah	Waxaa loola jeedaa heer tayeedka kasta oo ka soo baxa ISO, IEC, FAO.
26.	Warshad	Waxaa loola jeedaa shirkad ka shaqaysa soo saaris, ururin, bedelid, habayn, keenid, rakibaad iyo tijaabo.
27.	Adeeg	Waxaa loo jeedaa shaqo kasta oo loo qabto, si loo helo faa'iido kuna salaysan dalbashada iyo codsiga macmiilka, laguna kala qaato khidmad iyo wixii la mid ah.
28.	Oggolaansho	Waxaa loola jeedaa oggolaanshaha isticmaalka calaamadda heer-tayeedka ee ku xusan xeerkan.



29.	Qiimayn tayeed	Waxaa loola jeedaa wax-qabadyo isku xiriirsan oo lagu sugayo tayada, diiradana lagu saarayo ku qanaca buuxinta tayada laga rabo.
30.	Iibin	Waxaa loola jeedaa wax kala bedelasho ama is dhaafsi.

Qodobka 3-aad
Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerkani waa;-

1. Ilaalinta heer-tayeedka, cabbiraadda iyo sugidda kalsoonida badeecadaha, adeegga iyo dhaqan gelintooda.
2. Dhisidda Hay'adda Tayo-dhawrka Puntland oo u taagan horumarinta, daryeelidda iyo dhiiri gelinta heerarka tayo.
3. Jaan-goynta iyo horumarinta cabirraada heer tayeedka badeecadaha iyo adeegyada.
4. Horumarinta siyaasadda, jaan-goynta, dhawridda tayada badeecadaha iyo adeegyada.
5. Baarista iyo hubinta tayada badeecadaha soo gala Puntland ama laga dhoofiyo iyo kuwa gudaha Puntland laga soo saaro ama lagu isticmaalo.
6. Ilaalinta bed-qabka bulshada ee caafimaad, dhaqaale iyo deegaan ahaanba.
7. Sugidda kalsoonida isticmaalaha adeegyada iyo badeecadaha Puntland soo-gasha, midda ka dhoofa iyo wax soo saarka gudaha intaba.

Qodobka 4-aad
Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu maamulayaa dhammaan dhulka Puntland oo dhan.



CUTUBKA 2-AAD
HAY'ADDA TAYO-DHAWRKA

Qodobka 5-aad

Dhismaha Hay'adda Tayo-Dhawrka Puntland

1. Si loo gaaro ujeedooyinka ku xusan qodobka 3-aad, Xeerkan waxaa lagu asaasayaaa Hay'adda Tayo-Dhawrka Puntland.
2. Hay'addu waxay leedahay shakhsiyad qaanuuneed, madax bannaani maamul iyo mid dhaqaale.
3. Xarunta dhexe ee Hay'addu waa Magaalada Boosaaso, waxayna xafiisyo ku yeelanaysaa Gobollada, Degmooyinka iyo dhammaan Kastamada Puntland.
4. Hay'addu waxay yeelanaysaa astaan iyo shaabbad u gaar ah oo ay go'aamadeeda ku soo saarto.
5. Hay'adu waxay siyaasad ahaan hoos tagtaa Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Maalgashiga.

Qodobka 6-aad

Qaab-dhismeedka Hay'adda

1. Qaab-dhismeedka Hay'adda Tayo-dhawrka Puntland waa sidan: -
 - b. Maareeyaha Hay'adda.
 - t. Maareeye ku-xigeenka Hay'adda.
 - j. Waaxyaha Hay'adda.
 - x. Xafiisyada Gobollada, Degmooyinka iyo Kastamada.

Qodobka 7-aad

Magacaabista Mas'uuliyiinta Hay'adda

Maareeyaha iyo Maareeye ku-xigeenka Hay'adda waxaa lagu magacaabayaa digreeto uu soo saarayo Madaxweynaha Dawladda Puntland, iyadoo la raacayo shuruudaha ku xusan qodobka 10-aad ee Xeerkan.



Qodobka 8-aad

Xilka iyo Waajibaadka Hay'adda

Hay'addu iyadoo raacaysa Xeerkan iyo habraacyadiisa, xilka iyo waajibaadkeeda waxaa ka mid ah:-

1. Inay dejiso xeer-hoosaadka, qorshayaasha, habraacyada la xiriira jaan-goynta cabirrada tayada iyo badeecadaha lagu isticmaalayo Puntland.
2. Inay baarto ayna hubiso badeecadaha iyo adeegyada Puntland la keenayo inaysan xambaarsanayn khatar iyo halis waxyeelo u geysan karta bulshada.
3. Inay diyaariso halbeegyo iyo cabbirro looga hor-tagayo wax-yeelooyinka caafimaad oo ay u keeni karaan bulshada cuntooyinka iyo daawooyinka dhacay, kuwa tayadoodu hoosayso ama si u la kac ah tayadooda hoos loogu dhigay.
4. Inay hubiso tayada wax-soo-saarka gudaha Puntland, si loo ilaaliyo caafimaad ahaan iyo dhaqaale ahaan shacabka Puntland.
5. Inay abuurto shaybaar lagu hubiyo tayada badeecooyinka iyo agabka Puntland la soo geliyo ama laga dhoofiyo.
6. Inay bixiso shahaadooyin dhiiri gelin iyo astaamo tayo.
7. Inay kor u qaaddo wacyiga bulshada ee ku aaddan hal-beegyada iyo Dhawrida Tayada.
8. Inay gasho goobaha ganacsi ee ay taalo alaabta ay baarayso Hay'addu kadib markay si habboon u ogaysiiso mulkiilaha ama cidda haysata goobta ganacsi.
9. Inay u soo jeediso hay'adda ay khuseyso in lagala noqdo ruqsad ganacsi, ganacsadihii ay badeecadiisu ka hoosayso halbeegga tayo dhawrista.
10. Hawlgelinta iyo qaadashada shaqaalaha lagama maarmaanka u ah xil gudashadeeda, iyadoo xeerka la dhawrayo.



11. Hay'addu waxay la wareegi kartaa badeecadaha iyo adeegyada aan waafaqsanayn xeerarka loo dejiyey iyo kuwa caalamiga ah, iyadoo baabi'inaysa ama gubaysa badeecadahaas iyo adeegyadaas,
12. Inay qaaddo tallaabooyin kastoo ay ku xaqiijinayso ujeedooyinkeeda, iyadoo dhawraysa Xeerkan.

Qodobka 9-aad

Astaanta Hay'adda

Astaanta Hay'adda Tayo-dhawrka Dawladda Puntland waxay noqonaysaa, Astaanta Dawladda Puntland oo ay la socdaan labo caleemood ee Geedka Barwaaqo, calaamadda sax (√), Saddex xidigood iyo magaca hay'adda.

Qodobka 10-aad

Shuruudaha Maareeyaha Hay'adda Iyo Ku-Xigeenkiisa

1. Maareeyaha iyo Maareeye ku-xigeenka Hay'adda Tayo-dhawrka Puntland waa inay ahaadaan xirfadlayaal sare oo aqoon iyo khibrad u leh hawlaha hay'adda iyo maamulka.
2. Inay leeyihiin shahaado Jaamacadeed oo heerka 2-aad (Master ah), lana xiriirta arrimaha Tayo-Dhawrka.
3. Inay leeyihiin khibrad shaqo oo aan ka yarayn shan (5) sano.
4. Inaan xukun ciqaabeed oo kama dambays ah Maxkamad awood u lihi ku ridin.
5. Waa inay maskax ahaan caafimaad qabaan.
6. Inay ku dhaqmaan Diinta islaamka, laguna yaqaan hufnaan iyo amaano.

Qodobka 11-aad

Xil-waayidda Mas'uuliyiinta Hay'adda

Mas'uuliyiinta Hay'adda Tayo-dhowrku waxay xilkooda ku waayi karaan haddii ay:-

1. Geeri ku timaado ama ay haleesho caafimaad darro aan u saamixi karin



gudashada xilkooda.

2. Lumiyaan mid ka mid ah shuruudihii lagu soo xulay markii la magacaabayey.
3. Is casilaad qoraal ah u gudbiyaan Madaxweynaha, kana aqbal.
4. Maxkamadi ku xukunto fal-dembiyeed lagu helay dartii.
5. Madaxweynuhu xilka ka qaado xil-gudasho la'aan la xiriirta waajibaadka iyo ujeedooyinka Xeerkan.

Qodobka 12-aad

Dhaarta

1. Maareeyaha iyo Maareeye ku-xigeenka Hay'adda, hawl-wadeennada iyo cidkastoo xil ka qabanaysa Hay'adda, waxaa loo dhaarinayaa mas'uuliyadda loo dhiibayo.
2. Maareeyaha iyo Maareeye ku-xigeenka Hay'adda waxaa dhaarinaya Garsoore Maxkamadda Sare ah, iyadoo uu goob joog yahay Madaxweynaha Dawladda Puntland.
3. Dhammaan hawl-wadeennada kale ee Hay'adda waxaa dhaarinaya Garsoore Maxkamadeed.

Qodobka 13-aad

Xilka iyo Waajibaadka Maareeyaha Hay'adda

Maareeyaha Hay'addu wuxuu leeyahay xilka iyo waajibaadka soo socda:-

1. Waa mas'uulka ugu sarreeya, waana hagaha iyo madaxa maamulka hay'adda Tayo-dhawrka.
2. Wuxuu guddoominayaa shirarka iyo kulamada Hay'adda.
3. Wuxuu metelaa kuna hadlaa magaca Hay'adda.
4. Hagidda iyo maamulidda dhammaan hawlaha hay'addu u xil saaran tahay.



5. Magacaabista hawl-wadeennada Hay'adda, iyadoo la raacayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka Puntland iyo habraacyada Hay'adda.
6. Soo jeedinta Miisaaniyada hay'adda.
7. Saxiixa heshiisyada la xiriira hawlaha hay'adda.
8. Saxiixidda qoraallada rasmi ahaan uga soo baxa Hay'adda.
9. Wuxuu mas'uul ka yahay fulinta hawl-maalmeedka Hay'adda.
10. Wuxuu ku metelaa magaca hay'adda xiriirka ay la leedahay hay'adaha kale ee Dawladda iyo xiriirka hay'adaha caalamiga ah.
11. Wuxuu diyaariyaa, fuliyaana qorsha-hawleedka hay'adda.
12. Wuxuu u kuur-galaa fulinta dhammaan hawlaha Hay'adda ee ku cad Xeerkan.
13. Fulinta dhammaan waajibaadyada kale ee Hay'adda.

Qodobka 14-aad


Xilka iyo Waajibaadka Maareeye Ku-xigeenka Hay'adda

1. Maareeye ku-xigeenka Hay'addu wuxuu ka caawinayaa maareeyaha qorsheynta, hagidda iyo isku dubbaridka hawlaha Hay'adda iyo inuu maareeyaha kala taliyo arrimaha shaqada.
2. Maareeye ku-xigeenka Hay'addu wuxuu gudanayaa xilka maareeyaha marka uu maareeyuhu maqan yahay ama ay bannaanaato jagada maareeyaha.
3. Maareeye ku-xigeenka Hay'addu wuxuu qabanayaa hawlaha kale ee maareeyuhu u xil saaro.

Qodobka 15-aad

Hawl-wadeennada Hay'adda

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa waaxyaha iyo hawl-wadeennada lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadkeeda.
2. Hawl-wadeennada waxaa lagu qaadanayaa tartan furan, kadib marka



ogaysiiska jagooyinka bannaan lagu shaaciyo warbaahinta rasmiga ah, uuna socdo muddo aan bil ka yarayn.

3. Hawl-wadeennada waxaa lagu xulanayaa aqoonta iyo khibrada ay u leeyihiin shaqada.
4. Dhammaan shaqaalaha hay'addu waxaa lagu magacaabayaa habraaca Xeerka Shaqaalaha Rayid ka ah.
5. Dhammaan shaqaalaha hay'addu waxay xilkooda ku waayi karaan sida uu dhigayo habraaca Xeerka Shaqaalaha Rayid ka ah.

Qodobka 16-aad

Warbixinaha Hay'adda

1. Hay'addu waxay bilaha (Abriil iyo Oktoober), soo saaraysaa warbixin qoraal ah oo faah-faahsan oo ay u gudbinayso Madaxtooyada, Golaha Wakiillada iyo Wasaaradda Ganacsiga, warbixintaasi waa inay koobsataa dhammaan waxyaabaha u qabsomay, qiimaynta horumarka laga gaaray qorshayaashii la ansixiyey iyo caqabadaha jira.
2. Hay'addu waxay u gudbinaysaa warbixin mar kastoo ay ka soo dalbadaan Golaha Wakiillada ama Golaha Xukuumaddu.
3. Hay'addu waxay warbixinteeda ku baahinaysaa mareegaha Hay'adda si bulshadu ula socoto.
4. Warbixinta Hay'adda waa inuu saxiixaa Maareeyaha Hay'addu.

Qodobka 17-aad

Wada-Shaqeynta

1. Hay'adda Tayo-dhawrka Dawlada Puntland waxay wada shaqayn iyo la-tashiyo la yeelanaysaa markay soo saarayso Halbeegyada tayada Wasaaradaha iyo Hay'addaha kale ee saamaynta ku leh arrimaha Tayo-dhawrida.
2. Hay'adaha Dawladda waxaa ku waajib ah inay u fududeeyaan wada-shaqaynta



kala dhexaysa Hay'adda Tayo-dhawrka.

3. Hay'adda Tayo-dhawrka Dawladda Puntland waxay wada-shaqayn iyo la-tashiyo la yeelanaysaa Hay'addaha iyo Ururrada caalamiga ah ee ku shaqada leh arrimaha Tayo-dhawrida.

CUTUBKA 3-AAD

MAALIYADDA IYO XISAABAADKA HAY'ADDA

Qodobka 18-aad

Maaliyadda

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa Miisaaniyad sanadeed u gaar ah.
2. Hay'addu waxay diyaarinaysaa miisaaniyad sanadeedkeeda, si loogu daro miisaaniyadda guud ee Dawladda waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada.
3. Dhaqaalaha Hay'addu wuxuu ka imaan karaa qoondada miisaaniyadeed ee hay'adda oo ay ku jiraan miisaaniyada maxaliga ah, tan deeq bixiyaasha iyo khidmadaha loo qabto.
4. Sanad maaliyadeedka Hay'addu waa 12 bilood, wuxuu ka bilowdaa 1-da bisha Jannaayo, wuxuuna dhammaadaa 31-ka Diisembar ee isla sanadkaas.
5. Miisaaniyada hay'adda ee ku xusan farqada 3-aad ee qodobkan waxaa lagu shubayaa Akoon gaar ah oo Hay'addu ku leedahay Bankiga Dawladda, loomana isticmaali karo wax ka baxsan hawlaha Hay'adda.
6. Maareeyaha Hay'adda ayaa u gudbinaya miisaaniyad sanadeedka Hay'adda Wasaaradda Ganacsiga si ay ugu gudbiso Golaha Xukuumadda.

Qodobka 19-aad

Mushaharka, Gunnadda iyo Xuquuqaha

1. Mushaharka, Gunnooyinka, habeen dhaxa, xuquuqaha kale iyo kharashaadka hawlgalada shaqo ee Hay'adda iyo hawl-wadeennada waxaa laga bixinayaa sanduuqa Hay'adda.



2. Mushaharka iyo Gunnooyinka Maareeyaha, Maareeye ku-xigeenka iyo Hawl-wadeennada Hay'adda, waxaa lagu faah-faahinayaa miisaaniyadda gaarka ah ee Hay'adda.

Qodobka 20-aad

Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka

1. Hay'adda waxaa waajib ku ah inay si dhammaystiran oo sax ah u kaydiso buuggaagta xisaabaadka Hay'adda.
2. Dhammaan buuggaagta xisaabta iyo dukumintiyada kale ee maaliyadeed, waxaa baaraya Hanti-dhawrka guud ee Dawladda Puntland ugu yaraan hal mar sanad maaliyadeed kasta.

CUTUBKA 4-AAD

HEER TAYEEDYADA

QODOBKA 21-aad

Rasmiyaynta ama Baahinta Heer-Tayeedka

1. Hay'addu waxay ku baahin doontaa Faafinta Rasmiga ah heer-tayeed loo asteeyey agab, wax-soo-saar, wershadayn, wax-soo-saar socda, ama qaabayn, tayo agab, rakibaad, dhismo, tijaabin, hawlgal, adeegsi agab ama aalad laga isticmaali doono dhulka Puntland.
2. Hay'addu waxay wax-ka-beddel ku samayn kartaa ama meesha ka saari kartaa heer-tayeed horay loo faafiyey.
3. Hay'addu ka hor inta aysan si rasmi ah u baahin, waxay hubin doontaa in heer-tayeedka la dhaqan-gelinayo ama wax laga bedelayaa waafaqsan yahay tilmaamaha iyo astaamaha heer-tayeedyada rasmiga ah ee Hay'adda Tayo-Dhawrka.



QODOBKA 22-aad

Astaamaynta Heerarka

1. Hay'addu waxay si rasmi ah ugu baahinaysaa Faafinta rasmiga ah astaamaha heer tayeedka, waana ay beddeli kartaa.
2. Astaamaha heer tayeedku waxay kala soocayaan agabka iyo badeecadaha waafaqsan xeerkan iyo kuwa aan waafaqsanayn.
3. Hay'adda Tayo-dhawrka waxay u oggolaan kartaa, iyadoo shuruudaha ku habboon ku laraysa, in qof ama shirkad isticmaasho astaamaynta heer-tayeedka, haddiiba agabkaasi si buuxda u waafqsan yahay tilmaamaha sharciyeed ee u yaalla.
4. Codsii ah in la isticmaalo astaamaynta waxaa loogu soo gudbinayaa Hay'adda Tayo-dhawrka qoraal, iyadoo codsaduho soo raacinayo faah-faahinta agabka ama qaabka uu u doonayo astaamaha.
5. Qofna ma codsan karo astaamaha heer tayeedka ee ku xusan qaybtan, marka laga reebo agab kastoo oggolaansho ka haysta Hay'adda Tayo-dhawrka iyo agabka fuliya heer tayeedka Dawladda Puntland.
6. Qof kastoo:-
 - b. Soo codsada astaanta heer tayeedka galka agabka ama astaan kasta oo lagu dhajiyo agabka.
 - t. Ku dul sameeya ama ku wareejiya qafas ama weel uu ku dhex jiro agab ay ka muuqdaan astaamaha heer-tayeed ama weel ama qafas si uun loogu muujiyey astaamaha heer -tayeedka.
 - J. Waxaa loo aqoonsan doonaa in si buuxda loogu dhaqan-geliyey astaamaynta heer-tayeedka agabka lagu muujiyey.
7. Hay'adda Tayo-dhawrka markay ku qanacdo in sitaha oggolaanshuhu:-
 - b. Aanu buuxin shuruudaha lagu tilmaamay Xeerkan.



- t. Aanu soo saarin ama keenin agabkii oggolaanshuhu ku salaysnaa ee waafaqsanaa astaamaynta iyo heer-tayeedka Dawladda Puntland ee loo asteeyey.
- j. Joojiyey soo saaridda ama soo-dejinta agabka oggolaanshuhu ku salaysnaa.
- x. Wuxuu joojin doonaa ama hakin doonaa hawl-socodka ama dhaqangelinta oggolaanshaha muddo aan ka badnayn hal (1) sanno, sida ay Hay'adda Tayo-Dhawrka hadba u garato.

QODOBKA 23-aad

Diiwaanka Heer-Tayeedyada Dawladda Puntland

1. Hay'adda Tayo-dhawrka waxay samayn doontaa diiwaan ay ku dhan yihiin heerarka Tayada iyo wixii dukuminti ama xeerarka la xiriira.
2. Diiwaanku wuxuu ahaan doona mid bulshadu ku heli karto qaabka ama qaababka daabacaadeed oo ay qoondayso Hay'addu.
3. Diiwaanka waxaa ku jiri doona:-
 - b. Cinwaanka iyo tirsiga heer-tayeedka ama wareegtada ama xeerarka la xiriira.
 - t. Soo koobid tilmaamaysa intuu koobsanayo heer-tayeedku xeerarka ama wareegtada la xiriira.
4. Hay'adda Tayo-Dhawrka waxay ku hayn doontaa heer-tayeedyada hab danabaysan, si loo ilaaliyo dhawrsoonaanta dukumintiga iyo sharci ahaansahooda.
5. Hay'addu waxay awood u leedahay inay wax ka beddesho ama ka saarto heer tayeed diiwaan-gashan. Ogeysiinta heer-tayeed cusub waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah.



QODOBKA 24-aad

Ku-Dhawaaqidda, Faafinta iyo Hirgelinta

Waajibka Heer- Tayeedka

1. Hay'adda Tayo-dhawrka waxay waajib kaga dhigi kartaa Puntland oo dhan heertayeed ama qaybo ka mid ah marka loo arko in waajibintaasi lagama maarmaan u tahay dhaqan-gelin sharciyeed ee farsamo.
2. Markay Hay'addu ku dhawaaqdo in heer -tayeedku yahay mid waajib ah, waxa looga gol leeyahay:-
 - b. Ka-hortegidda dhaqannada been-abuurka iyo khiyaamadu ku jirto.
 - t. Ilaalinta caafimaadka bini-aadamka iyo badbaadadiisa.
 - j. Badbaadinta nolosha iyo caafimaadka noolaha kale sida xayawaanka iyo dhirta.
 - x. Ilaalinta deegaanka.
3. Hay'adda Tayo-dhawrka waxay dib ula noqon kartaa heer-tayeed ay hore u waajibisey.
4. Hay'adda Tayo-dhawrku waxay heer-tayo ka dhigi doontaa waajib, iyadoo hubinaysa in:-
 - b. Mushkiladda la xallinayo inay tahay mid sugan oo muuqata.
 - t. Soo-dhexgelidda dawladdu tahay mid lagama maarmaan ah.
 - j. Si kale looga gun-gaari karin hadafka laga leeyahay heer-tayeedka, iyadoo waajib aan laga leexleexan karin laga dhigo mooyaane.
 - x. Xeerkii la xiriirey dhaqangal yahay.
 - Kh. Ogeysiin ku habboon oo hore loo gaarsiiyey Hay'adda Ganacsiga Caalamiga ah (WTO).



5. Ogeysiinta ama ku-dhawaaqidda heer- tayeed looga dhigayo mid waajib ah waxaa lagu soo saaraya ama lagu baahinayaa Faafinta Rasmiga ah iyo ugu yaraan mid ka mid ah wargeysyada heer Puntland, iyadoo si cad loogu caddaynayo inuu heer-tayeedkaasi yahay mid waajib ah iyo taariikhda uu dhaqangal noqonayo.
6. Ogeysiinta waa in laga helaa:-
 - b. Magaca, lambarka ama tirsiga heer-tayeedka.
 - t. Sababta looga dhigay heer-tayeed waajib ah.
 - j. Tilmaanta muujinaysa meesha laga heli karo ama laga dheehan karo diiwaanka tafaasiisha dhammaystiran leh ee Hay'adda Tayo-Dhawrka.
 - x. Marjaca ama tilmaanta sharciyadda loo cuskaday waajib ka-yeelista heer-tayeedka si waafaqsan xeerkan.
 - kh. Oggolaanshaha in ciddii diidan waajibinta heer-tayeedka ugu soo gudbin karto Hay'adda Tayo-Dhawrka diidmadeeda oo qoraal ah muddo soddon (30) maalmood gudahood ah, iyadoo qaabka gudbinta loogu faah-faahin doono ogeysiinta.
7. Marka uu go'aanka ku-dhawaaqidda Waajibinta heer-tayeed qaato, Hay'adda Tayo-Dhawrku waxay ku daabici doontaa Faafinta Rasmiga ah.

QODOBKA 25-aad

Dhawrsoonaanta Sharci ee Dukumintiga

Hay'adda Tayo-Dhawrka

1. Heerarka Tayo ee Dawladda Puntland waxay sharci ahaan u dhawrsoon yihiin Hay'adda Tayo-Dhawrka.
2. Qofna ma daabici karo, dib uma faafin karo, ma kaydin karo, mana baahin karo heer -tayeedyada Dawladda Puntland iyadoo aan oggolaansho rasmi ah laga



helin Hay'adda Tayo-Dhawrka marka laga reebo in qofku si gaar ah ama cilmibaaris u adeegsanayo.

CUTUBKA 5-AAD

HAL-BEEGYADA TAYO-DHAWRKA

QODOBKA 26-aad

Hal-Beegyada Tayo-Dhawrida

Ee Si KMG Ah Loogu Shaqeynayo

Hay'adda Tayo-Dhawrka Puntland waxay si ku meel gaar ah ugu shaqeynaysaa mid kamida ah hal-beegyada caalamka ee la aqoonsan yahay oo la waafajiyey Shareecada Islaamka intii laga dhammeystirayo habraac iyo halbeeyo buuxa oo Puntland leedahay.

QODOBKA 27-aad

Diyaarinta Hal-Beegyada iyo Ansixintooda

Halbeegyada waxaa soo saarayaa Hay'adda Tayo-dhawrka, iyadoo kaashanaysa khuburo iyo Hay'adaha Dawladda ee ay khusayso, waxaana laga ansixinayaa Golaha Xukuumadda, kadib markay u gudbisu Wasaaradda Ganacsigu.

QODOBKA 28-aad

Diiwaanka Hal-beegyada

1. Hay'adda Tayo-Dhawrka waxay yeelanaysaa diiwaan u gaar ah hal-beegyada Tayo-Dhawrka Puntland.
2. Marka wax laga beddelayo ama lagu darayo waxaa lagu caddeynayaa diiwaanka dhammaan isbedellada iyo qaabka ay u dhaceen.

QODOBKA 29-aad

Faafinta Hal-Beegyada

1. Waxaa Khasab ah in lagu faafiyo mareegaha iyo warbaahinta dhammaan hal-beegyada cusub ujeedooyinkooda, tixraacooda, taariikhda la ansixiyey iyo faah-faahinta loo baahan yahay oo dhan.



2. Maareeyayaasha hay'addu waxay wax-ka-beddel ku sameyn karaan ama ka saari karaan Halbeeg ama jaangooyo hore loo faafiyey.

QODOBKA 30-aad

Hal-beegyada Khasabka ah

1. Hay'adda Tayo-Dhawrku waxay awood u leedahay, iyadoo ku saleynaysa talo-bixinta guddiyada farsamo, inay soo saaraan hal-beegyo ama jaangooyooyin lagu xakameynayo badeecooyinka xiriir toos ah la leh noolaha iyo deegaanka.
2. Waxaa reebban soo dhoofinta, soo-saaridda ama dhoofiska badeeco hal-beegeedda uusan waafaqsaneyn kan lagu caddeeyey go'aannada iyo faafinta rasmiga ah ee Hay'adda.
3. Waxaa reebban isticmaalka summadda ama astaanta tayada Hay'adda iyadoo aan loo haysan oggolaansho cad.
4. Waxaa reebban in Puntland la soo geliyo ama laga dhoofiyo agab ama anfac been abuur ah ama tayadooda laga been-sheegay.
5. Waxaa reebban in Puntland la soo geliyo agab ama anfac taariikhdeedu dhacsan tahay ama ka mid ah badeecadaha daaha oo dhicitaankeedu ka dhiman tahay wax ka yar hal (1) sano.
6. Agabka ama anfac muddada isticmaalkiisu ay ka yar tahay hal (1) sano waa inuusan ka yaraan wakhtiga u harsan marka uu soo galayo Puntland 50% (boqolkiiba konton) guud ahaan wakhtigiisa nolosha.
7. Qofkii ku xad gudba faqrada (1,2,3,4,5 iyo 6) ee qodobkan iyo dhammaan go'aannada Hay'adda Tayo-Dhawrka, waxaa lala tiigsanayaa Shuruucda Puntland.



QODOBKA 31-aad

Dhaqan-gelinta Halbeegyada

1. Waxaa waajib ku ah ganacsatada inay dhawraan hal-beegyada Puntland.
2. Marka la furayo warshad ama qeybo wax-soo-saar waa inay markastaba halbeegoodu ku saleysan yahay midka Puntland iyo kan caalamka u degsan.

QODOBKA 32-aad

Adeegsiga Cabirrada

Hay'adda Tayo-Dhawrka Puntland waxay ku soo saaraysaa xeer-hoosaadkeeda diiwaanka cabirrada Puntland oo faah-faahsan.

Qodobka 33-aad

Baarayaasha

Magacaabidda Baarayaasha:-

1. Baarayaasha waxaa magacaabaya Maareeyaha hay'adda si waafaqsan qodobada xeerkan.
2. Baarayaashu waa shaqaale ka tirsan hay'adda Tayo-Dhawrka Puntland.

QODOBKA 34-aad

Awoodaha iyo Waajibaadka Baarayaasha

1. Baarayaasha xil gudashoodu u oggol yahay Xeerkani waxay:-
 - b. Tusayaan cidda baaridda lagu samaynayo dukumintiga aqoonsigooda caddaynaya iyo mas'uuliyadooda.
 - t. Ogeysiinayaan mas'uulka goobta agabka ama walxaha laga qaaday goobta iyo sababta loo qaaday, iyadoo haddii laga codsado bixinaya rasiid caddaynaya agabka goobta laga qaaday.
 - j. Ogeysiis qoraal ku siinayaan mulkiilaha wixii agab ah ee laga qaaday goobtiisa markuu ka maqan yahay.



2. Baaruhu waa inuu goobjoog ahaadaa marka weel afka ka xiran oo lingaxan laga jarayo qafaska.
3. Baare lagu magacaabay si waafaqsan Xeerkan, wuxuu gudanayaa hawlihiisa baaritaan gaar ahaan wuxuu hubinayaa in agabka hawlgallada iyo badeecaduhu waafaqsan yihiin heer-tayeedyada, cabbiraadaha iyo heerarka farsamo ee loo dejiyey.
4. Si loo fuliyo Xeerkan, Qof baare ah: -
 - b. Wuxuu iyadoo uu haysto sababayn ku filan, baaris u geli karaa goob la tuhunsan yahay in lagu wershadaynayo, lagu soo saarayo, lagu habaynayo agab amaba lagu samayn karo intaasoo dhan, amaba loogu kaydinayey si looga ganacsado qaab aan sharciga waafaqsanayn.
 - t. Wuxuu baari karaa, muunadna ka qaadan karaa walax kastoo loo tuhmo in lagu wershadayn karo, lagu badin karo, lagu qaabayn ama habayn karo agab, iyadoo uu awood u leeyahay in loo furo goobtaas ama walxaha dhexyaalla ee loo isticmaali karo hawlaha tuhunka keenay.
 - j. Wuxuu baari karaa oo qoraallo ka samaysan karaa wershadayn, qaabayn ama samayn agab oo socota.
 - x. Wuxuu baari karaa hawl-gal ama hawl-fulin isla goobtaas ka socota oo la xiriira ama lala xiriirin karo tuhunka baaristu ku salaysan tahay.
 - Kh. Wuxuu ka dalbi karaa qofkii ay soo gasho hawshu inuu soo saaro ama keeno wixii xog diiwaan ama qoraal ah ee la xiriira hawlgalka badeecadda ama agabka ama qaabaynta uu ku wajahan yahay.
 - d. Wuxuu baari karaa oo nuqul ama sawir ka qaadan karaa diiwaan ama qoraal uu u arko inuu wax ka tari karo ama ka iftiimin karo hawl-galka uu ku jiro, iyadoo uu isla mar ahaantaa wixii faah-faahin ah ka dalban karo mas'uulka goobta jooga oo uu ka qaadan karo wixii diiwaanka xogta ah ee daruuri u ah baaristiisa iyo go'aannadiisaba.



- r. Wuxuu xog dheeraad ah ka raadin karaa qof kastoo uu u tuhmo inuu wax kaga soo kordhin karo baaristaas oo ku sugan ama ka shaqeeyey goobta ama qof kastoo loo tuhmo inuu hayo agab ama walxo caddayn dheeraad ah u ah baarista.
- s. Wuxuu qaadi karaa tallaabada ku habboon ee lagu joojinayo wershadaynta, soo-saaridda, qaabaynta, iwm. agabka sharciga baalmarsan ee aan waafaqsanayn heer -tayeedyada waajibka ah iyo shuruucda farsamo ee la xiriira, si aan badeecadda noocaas ahi u gelin suuqa.
5. Baaruhu:-
- b. Wuxuu gacanta ku dhigi karaa ama soo xerayn karaa, si loo soo baaro, badeecad ama agab kastoo uu tuhmo in fal garab marsan sharciga lagu galay.
- t. Wuxuu gacanta ku dhig karaa ama qaadi karaa agab, diiwaanka ama qoraalka uu baaruhu u arko inay wax ka tari karaan marag-furka qaab, agab ama hab lala baalmaray sharciyadda ku cad xeerkan.
6. Marka ama Halka:-
- b. Goobta baaritaanku soo galay aan lagu jirin.
- t. Mulkiilaha, ku-jiraha ama qofka ka mas'uulka ahi uu si ku-meel-gaar ah uga maqan yahay.
- j. Gelitaanka goobta la isu diido ama caqabado la hor dhigo.
7. Baaruhu wuxuu ku geli karaa goobta awood xoog loo adeegsado, iyadoo la tix-gelinayo faqradaaha soo socda:-
- b. Dedaal iyo tallaabooyin ku habboon uu qaaday Baaruhu inuu helo mulkiilaha, qofka ku jira ama mas'uulka goobta ka hor inta aanu adeegsan awooddiisa.
- t. Uu baaruhu kaga tago goobta iyadoo ah sidii uu ugu yimi, oo ka xafidan tuugta iyo bililiqada.



QODOBKA 35-aad

Khidmadda Heer-Tayeedka

1. Soo-saarayaasha, soo-dejiyayaasha iyo dhoofiyayaasha adeegyada, agabka iyo badeecaduhu waxay bixin doonaan khidmadda Heer- tayeedka.
2. Khidmadaha laga qaadayo adeegyada ay bixiso hay'addu waxaa soo jeedinaya Wasaaradda Ganacsiga iyo Wasaaradda Maaliyadda, iyagoo la tashanaya ganacsatada, waxaana laga ansixinayaa Golayaasha Dawladda.

QODOBKA 36-aad

Astaamaha Heerka Tayada iyo Shahaadada

1. Hay'addu waxay leedahay astaanta u gaar ah oo loo yaqaano astaanta tayada, waxaana isticmaalaya wax soo-saaraha, dhoofiyaha iyo soo-dhoofsadaha kaddib markii ay oggolaato Hay'adda Tayo-Dhawrka in badeecada ay waafaqsan tahay halbeegyada Puntland.
2. Hay'addu waxay bixinaysaa shahaado tayo taasoo muujinaysa in adeega ama badeecada ay waafaqsan tahay hal-beegyada gaarka u ah badeecadaas.
3. Hay'addu waxay caddeynaysaa shuruudaha iyo habka lagu qaadan karo astaanta iyo shahaadada tayada.

QODOBKA 37-aad

Go'aannada Hay'adda Tayo-dhawrka

1. Go'aannada Hay'adda, dadku waxay uga caban karan Guddiga Cabashooyinka ee Hay'adda.
2. Guddiga cabashooyinku xubnaha ay ka kooban yihiin waxaa lagu qeexayaa xeer-nidaamiye gaar ah oo Hay'addu soo saarto.
3. Ciddii ku qanci wayda go'aanka Guddiga Cabashooyinka Hay'adda waxay cabasho uga qaadan karaan Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland.



QODOBKA 38-aad

Iska hor imaadka Danaha Isdiidan

Madaxda sare ee Hay'adda iyo shaqaalaha waxaa ka reebban inay qabtaan hawlo ka hor iman kara mas'uuliyadaha Hay'adda ama carqaladeyn kara fulinta waajibaadkeeda.

CUTUBKA 6-AAD

DEMBIYADA IYO CIQAABAHA

QODOBKA 39-aad

Ganaaxa

Hay'addu waxay awood u leedahay in ay ganaaxdo ciddii ku xad gudubta Xeerkan iyo Habraacyadiisa haddiise uu jiro fal-dambiyeed waxaa loo gudbinyaa hay'adaha ku shaqada leh.

Qodobka 40-aad

Fal-Dembiyeedyada

Qofku wuxuu gelayaa Fal-dembiyeed haddii:-

1. Qofku sameeyo ama isticmaalo calaamad muujinaysa in badeecadu leedahay astaamaha heerarka, isagoo aan haysan ruqsad ku habboon.
2. Qofku soo-saaro, dhoofiyo, soo-dejiyo, kaydiyo, safriyo, qaybiyo badeecadaha ama Adeegyada aan haysan oggolaanshaha lagama maarmaanka u ah ee Hay'adda.
3. Qofku isticmaalo halbeegyo aysan ansixin ama laashay Hay'adda Tayo-dhawrka Puntland.
4. Qofku wareejiyo oggolaanshaha lagu helay si waafaqsan Xeerkan iyo Habraacyadiisa, si loogu isticmaalo ujeedo aan sax ahayn.
5. Qofku keeno, xayeesiiyo ama soo-saaro badeecado laga been abuuray, oo waxyeelayn kara caafimaadka iyo bedqabka dadka, xoolaha ama deegaanka.



6. Qofku soo-saaro shahaadada oggolaanshaha oo been-abuur ah ee badeecaha iyo adeegyada aan waafaqsanayn Xeerkan.
7. Qofku diido inuu tuso dukumintiyada badeecada ama muunado marka kormeeraha ama baaraha Hay'addu codsado.
8. Qofku hor istaago, aflagaadeeyo ama weeraro kormeeraha ama qof ka caawinaya kormeerkooda.
9. Qofku bixiyo macluumaad khaldan ama been ah marka kormeeruhu codsado xog la xiriirta badeecada ama habka wax-soo-saarka.
10. Qofku baabi'iyoo badeecad qariyo dukumintiyoo muhiim ah, masaxo ama tirtiro calaamado si looga hortago baaritaan.
11. Qofku meeshii lagu ogaa ka qaado, fogeeyo ama iibiyo, dib u dhoofiyo, baab'iyoo ama wax-ka-beddela badeecad baaris ku jirtey, ka hor inta aan go'aan ka soo bixin.
12. Qofku siiyo si toos ah ama si dadban Baare gudanaya waajibaadkiisa abaalmarin dhaqaale ama ballan qaad kale.
13. Qofku galo falkasta oo ka hor imaanaya heerarka, astaamaha badeecadaha iyo adeegyada looga baahan yahay.
14. Baarayaasha, Shaqaalaha iyo maamulka hay'addu waxay galayaan faldembiyeed haddii:-
 - B. Ay shaaciyaan macluumaad sir ah oo ay ku heleen shaqada xafiiska, haddii aanay jirin oggolaansho sharci ama amar maxkamadeed.
 - T. Uu xannibo si sharci darro ah agab ama badeeco sax ah.
 - J. Lagu helo inuu laaluush ku qaatay gudashada waajibkiisa.
 - X. Uu galo heshiis uu kaga gaabinayo gudashada waajibkiisa, isagoo qarabaya ama oggolaanaya in laga fakado ama la majara-habaabiyo habsami-fulinta waajibaadka saaran.
- Kh. Uu adeegsado xilkiisa iyo mas'uuliyaddiisa si uu hanti ugu urursado.



Qodobka 41-aad

Ciqaabaha

1. Qofkii lagu helo fal-dembiyeedyada ku xusan qodobka 40-aad waxaa lagu xukumayaa:-
 - b. Haddii fal-dembiyeedku yahay markii koowaad, ganaax aan ka badnayn labo kun (2,000) oo dollar iyo xabsi aan ka badnayn saddex (3) sano.
 - t. Haddiise fal-dembiyeedku yahay mid la caadaystay ganaax aan ka yarayn shan kun (5,000) oo dollar iyo xabsi aan ka badnayn sideed (8) sano.
2. Maamulka iyo Hawl-wadeennada Hay'adda waxaa lagala wareegayaa wixii hanti ah ee lagu urursaday dembiga la galay hadduu yahay lacag, hanti ma-guurto ah ama mid kaleba.
3. Fal-dembiyeedku maaha mid la caadaystay haddii aan la gelin shan (5) sano gudaheed xukunka fal-dembiyeedkii hore.
4. Maxkamaddu waxay ciqaabaha fal-dembiyeedyada ku xusan qodobkan ku dari kartaa:-
 - B. In lala wareego dhammaan ama qayb ka mid ah badeecada mawduuca fal-dembiyeedka ama la hirgeliyo in la baabi'iyo.
 - T. Inay ka joojiso inuu dib uga shaqeeyo ganacsigaas ama laalista shatiga.
 - J. Mamnuucidda soo-saaridda ama iibinta agabka ama badeecadaha aan la jaanqaadayn heer- tayeedyada Dawladda Puntland.
 - X. Ama amar kale oo lagama maarmaan ah si loo gaaro caddaalad.
5. Marka laga soo tago ciqaab kastoo lagu soo rogo dambiilaha lagu helo dambiga sida ku xusan qodobkan, maxkamaddu waxay ku amri kartaa dambiilaha inuu magdhow siiyo dhibbanaha qaddarka ay maxkamaddu goyso.
6. Marka la qiimeynayo magdhowga, maxkamaddu waxay tixgelinaysaa wixii khasaare dhaqaale, jireed ama nafsiyeed ah ee soo gaaray dhibbanaha fal-dembiyeedka.



Qodobka 42-aad

Shirkadaha

Haddii fal-dembiyeed hoos yimaada Xeerkan ay gasho shirkad si ula kac ah waxay mutaysanaysaa ganaax lacageed iyo shatiga oo lagala laabto, haddiise fal-dembiyeedku yahay mid aan ula kac ahayn waxay mutaysanaysaa ganaax lacageed iyo digniin waxaana jaangoynaya Hay'adda Tayo dhawrka.

Qodobka 43-aad

Shaqaalaha iyo Wakiillada

1. Haddii fal-dembiyeed hoos yimaada Xeerkan uu geysto shaqaale ku shaqeynaya baaxadda shaqadiisa oo la caddeeyo in lagu galay awoodda, rabitaanka, aqoonta ama la-tashiga loo shaqeeyaha, loo shaqeeyuhu wuxuu mudanayaa ciqaab la mid ah tan shaqaalaha.
2. Haddii fal-dambiyeed hoos yimaada Xeerkan uu galo wakiil ama shuraako ku shaqeynaya baaxadda shirkadiisa ama ganacsigiisa oo la caddeeyo in lagu galay awoodda, rabitaanka, aqoonta ama ku qanacsanaanta maamulaha ama la-hawlgalayaasha kale ee shirkadda, maamulaha ama la-hawlgalayaashu waxay galayaan dembi la mid ah waxayna mutaysan karaan ciqaab la mid ah tan shaqaalaha.

Qodobka 44-aad

Gacansiinta ama Dhiirigelinta

Qof kastoo gacan ka geysta, ku dhiirigeliya fulinta ama gelida fal-dembiyeed hoos yimaada Xeerkan, wuxuu galayaa dembi la mid ah wuxuuna mutaysan karaa ciqaab la mid ah qofkii dembiga galay.



CUTUBKA 7-AAD:
QODOBO KALA DUWAN
QODOBKA 45-aad

Kormeerka iyo Kor-joogtaynta

Hay'addu waxay si joogto ah u samaynaysaa kormeer ay ku hubinayso in la fuliyey Xeerkan iyo Xeer-nidaamiyaayasha ay hay'addu soo saarto.

QODOBKA 46-aad

Xiriirrada Hay'adda

Hay'addu waxay dhaqan-gelinaysaa Heshiisyada Caalamiga ah ama gobol ee ay Soomaaliya qeybta ka tahay, kuwaas oo la xiriira arrimaha hal-beegyada iyo Tayo-dhawrka.

QODOBKA 47-aad

Ilaalinta Siraha Ganacsi

1. Saraakiisha iyo Hawl-wadeennada Hay'addu ma shaacin karaan macluumaad iyo xog kastoo ay ku heleen shaqada xafiiska, haddii aanay jirin oggolaansho sharci ah ama amar maxkamadeed.
2. Ka warbixinta badeecad, wax-soo-saar ama hawlgal waafaqsan xeerkan, waxba uma dhimi karto in loo diiwaan-geliyo, si Xeerkan ama kuwa kale ee dhaqangalka ah waafaqsan.
3. Loo-shaqeeyuhu iskama eryi karo, mushaharkiisa ama gunnadiisa ma dhimi karo shaqaalihiisa xog ay la wadaageen Hay'adda Tayo-dhawrka darteed.

QODOBKA 48-aad

Dabarka Dacwadaha

Xubnaha Hay'adda Shakhsi ahaan looma raacayo lumid ama khasaare kastoo gaaray dhinac saddexaad oo ka dhasha xil gudashadiisa, haddii lumid ama khasaarahaasi loo gelin si bareer ah, taxadar la'aan ah ama khilaafid Xeerarka iyo tallooyinka Mas'uuliyiinta.



QODOBKA 49-aad

Hirgelinta Shaybaar

1. Hay'adda Tayo-Dhawrku waxay hirgelinaysaa shay-baaro casri ah, si loogu sameeyo tijaabada iyo cabbirrada badeecadaha iyo adeegyada una soo saaraan shahaadooyin caddeynaya tayadooda, looguna hormariyo hababka tijaabada.
2. Hay'ad kale oo Dawladeed ama mid gaar loo leeyahay ma yeelan karto shaybaar u gaar ah oo la xiriira tayo-dhawrka.

QODOBKA 50-aad

Codsiga iyo Ilaalinta Xogaha

1. Hay'adda Tayo-Dhawrka Puntland waa Hay'adda kaliya ee u xilsaaran xogta khuseysa hal-beegyada iyo Dhawrida Tayada Puntland.
2. Cidii u baahan xog ku saabsan hal-beegyada Puntland waxay ka dalban karaan oo kaliya Hay'adda Tayo-Dhawrka Puntland.
3. Hay'addu waxay ilaalinaysaa sirta ganacsi iyo xogta kale ee qarsoodiga ah oo ay ka soo ururisay shirkadaha si waafaqsan xeerkan iyo shuruucda kale ee Dawladda Puntland.

QODOBKA 51-aad

Fasiraadda Xeerka

Wixii aan Xeerkan si cad loogu qeexin, waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka, Xeerarka kale ee dhaqan-galka ah iyo Xeerarka Caalamiga ah ee Heer tayeedyada.

QODOBKA 52-aad

Xeer-Nidaamiye

Hay'addu waxay soo saari kartaa Xeer-nidaamiyayaal iyo habraacyo lagu sii hagaajinayo habsami-u-socodka xilgudashada lagu tilmaamay Xeerkan.



QODOBKA 53-aad

Burin

Xeerkan wuxuu burinayaa Xeer kastoo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin sida:-

1. Waxaa la buriyey Xeerka Heer-tayeedka iyo dhowrida tayada badeecadaha Puntland (Xeer Lr.1, 25/08/2016).
2. Waxaa la buriyey Xeerka Khidmada Tayo-dhawrka badeecadaha Puntland (Xeer Lr. 12, 01/10/2018), kadib marka la dhaqangeliyo qodobka 35-aad ee Xeerkan.
3. Waxaa la buriyey Xeer, Xeer-hoosaad iyo wareegta kastoo fulineed oo aan waafaqsanayn ama la jaanqaadi karin qodobada Xeerkan.

QODOBKA 54-aad

Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkan wuxuu dhaqan-gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dowladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

